MINNESOTA
OFFICE OF OMBUDSMAN
FOR MENTAL HEALTH AND
DEVELOPMENTAL DISABILITIES

332 Minnesota Street, Ste W1410
First National Bank Building
Saint Paul, Minnesota 55101-2217

Cod: 651-757-1800
Khadka Bilaashka ah: 800-657-3506
Fakis: 651-797-1950
TTY/Cod: Adeega Minnesota Relay Service 711
https://mn.gov/omhdd

Nidaamka Xukminta Daawaynta Madaniga ah. Minn Stat. §§ 253B.07 - 253B.09 iyo 253B.17

Xaashidan xaqiiqda ayaa waxay sharraxaysaa geeddi-socodka xukminta daawaynta madaniga ah. Waxaa muhiim ah in la muujiyo in Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta ee Minnesota, 253B, uu si cad u sheegayo in aqbalaada daawada ee ikhtiyaariga ah laga doorbidayo xukminta daawaynta. 253B.04 wuxuu u oggolaanayaa qof kasta oo ka weyn da'da 16 inuu codsado aqbalaad ikhtiyaari ah si looga daaweeyo ku tiirsanaanta kiimikada, cudurada dhimirka iyo naafonimada korriinka. Carruurta ka yar 16 sano waxaa si iskood ah ugu aqbali kara waalid ama mas'uul sharci ah qiimayn madax bannaan marka la sameeyo kadib.

Sharcigu wuxuu sidoo kale sheegayaa qofka si ikhtiyaari ah uga qayb qaadanaya daawaynta cudurka dhimirka laguma dabaqayo xukminta daawaynta haddii:

1. Qofku wuu bixiyay ogolaansho warqaba ama qof awooda sharci u leh inuu taas sameeyo ayaa u ogolaaday*; iyo,
2. qofku wuxuu ka qaybqaadanayaa daawayn caafimaad oo haboon oo ay kujiraan dawooyinka neerfaha iyo ECT.
   Tani ma khusayso haddii maxkamadu u aragto inaysan u badnayn inuu qofku ku sii jiri doono daawaynta ama uu iskaashi la yeelan doono daawaynta aan ka ahayn in qofka loo xukmiyo daawaynta mooyee; sidoo kale ma khusayso dadka hoos imanaya Rule 20 (Xeerka 20) ama loo xukminayo daawaynta in ay yihiin qof qaba cudurka dhimirka oo khatar ku ah dadweynaha.

   *Dadka sharci ahaan loo idmaday inay ogolaansho bixiyaan waxay noqon karaan wakiilka daryeelka caafimaad, mas'uul ama ilaaliye ama go'aan qaade beddel ah oo ay maxkamadu u magacawday ujeedadan.

1) Baaritaanka Ka Horreeya Codsiga

Qof kastaa ayaa kuu codsan karaa in degmadu ay samayso baaritaan ku saabsan in loo baahanyahay in laguu xukumo daawayn iyo in kale. Kahor inta aan wax codsi ah la xaraynin, kooxda baaritaanka codsiga kahor ee degmadu waa inay dib u eegaan. Kooxda baaritaanka ayaa soo ururin doona macluumaadka ku saabsan xaaladdaada waxayna go'aamin doona inaad buuxisay shuruudaha loogu baahanyahay xukminta daawaynta. Nidaamkan waa in ay ku jiraan:

1. shakhsiyan in ay kuu waraystaan (shaqsi ahaan in loo sameeyo ayaa la doorbidayaa) iyo dadka kale ee u muuqda inay aqoon u leeyihiin xaaladaada;
2. aqoonsashada iyo baaritaanka habdhaqanka lagugu soo eedeeyey ee qiil u sameynaya xukunkaaga;
3. aqoonsashada iyo sahaminta beddelaadaha kale ee xukminta daawaynta iyo sharrixitaanka sababta loo diiday;
4. soo ururinta macluumaadka la xiriira qaadashada daawooyinka sida awooda aad u leedahay in aad ogolaansho bixiso, haddii aad haysato dardaaranka daryeelka caafimaadka, jiritaanka cid sharci ah oo go'aamisa daryeelka caafimaadka; iyo macluumaadka ku saabsan inaad u badantahay inaad ogolaato daawada iyo in kale;

5. Ula xiriirida caymis bixiyaha jira wixii macluumaad ah ee ku saabsan bixinta kharashka daryeelka, taariikhda daawaynta ee la xiriirta iyo bixiyeyaasha hadda jira; iyo,
6. In lagu siinayo ogaysiis kuu sharaxaya xuquuqdaada, habka xukminta daawaynta iyo saamaynta sharciyeed ee ay leedahay xukminta daawayntu.

Qofka kaa soo booqda kooxda baaritaanka si uu kuula yeesho waraysi shaqsiyeed waa inuu isu kaa sheego oo uu kuu sharaxaa sababta uu asaga/ayadu uu kula hadlayo. Qofkani waa inuu sidoo kale kuu sharraxaa in wax kasta oo aad dhahdo loo isticmaali karo warbixinta iyo maxkamada. Qofkani waa inuusan noqonin isla qofka iskudayaya inuu kugu xukmiyo daawaynta. Ma jiro xubin ka socda kooxda codsiga baaritaanka kahor oo loo ogolyahay inuu xareeyo codsi ku saabsan xukminta daawaynta madaniga ah. Kooxdani waxay kaloo su'aalo weydiin karaan qoyskaaga, shaqaalaha cusbitaalka, shirkada caymiska iyo kuwo kale. Sharcigu wuxuu u ogolyahay kooxda inay taas sameeyaan iyada oo aan ogolaansho lagaa helin adiga. Had iyo jeer waa fikrad wanaagsan in aad qorato qofka magaciisa iyo macluumaadka kale si ay kaaga caawiso inaad xusuusato.

Haddii aysan wareysi kula yeelanin kooxda baaritaanka ee codsiga kahor oo laakiin la xareeyay codsiga xukminta daawaynta, u sheeg qareenkaaga. Marka kooxda samaynaysa baaritaanka codsiga kahorreeya ay ku taliso in la sameeyo xukminta daawaynta, warbixin qoran ayaa loo diri doonaa qareenka degmada. Haddii kooxda samaynaysa baaritaanka codsiga kahorreeyaa aysan ku talinin in la sameeyo xukminta daawaynta, codsadaha ayaa wuxuu weydiisan karaa qareenka degmada inuu sii wado codsiga si kasta.

2) Dalab/codsi xaraynta

Qof kasta oo danaynaya, marka laga reebo xubnaha ka mid ah kooxda codsiga baaritaanka kahor, ayaa wuxuu soo gudbin karaa codsiga xukminta daawaynta. Codsiga waxaa laga yaabaa in laga xareeyo degmada qaadaysa mas'uuliyada maaliyadeed ama halka aad hadda joogto. Waxaad xaq u leedahay inaad aragto dalabka la xareeyay.

3) Dhagaysiga Hordhaca ah (sidoo kale loo yaqaano dhagaysiga "Sababta Suurtagalka ah")

Kaddib marka la xareeyo codsiga xukminta daawaynta, maxkamadu waxay amri kartaa in lagu geliyo "hayn/qabasho maxkamadeed." (Eeg: Haynta Xaaladaha Deg dega ah iyo Xaashida Xaqiiqda Maxkamada.) Waxaa suuragal ah inaad horayba ugu jirtay haynta xaaladaha deg dega ah xilligan, laakiin maxkamadu way dheerayn kartaa muddada hayntaada iyadoo adeegsanaysa xukunka maxkamada. Muddo 72 saacadood ah gudahood marka lagu geliyo haynta maxkamada, dhagaysi hordhac ah waa in la qabtaa si loo go'aamiyo in haynta maxkamadu ay sii socon doonto iyo in kale. Maalmaha asbuuca dhamaadkiisa (sabtida iyo axada) iyo feestooyinka sharciga ah laguma tiriyo muddada 72-saac ah. Waxaad xaq u leedahay inaad la kulanto qareenka ay kuu magacawday maxkamadu dhagaysiga kahor. Waxaad soo gudbin kartaa codsi ku saabsan dhagaysigaaga hordhaca ah IN lagu qabto maxkamada degmada aad ku nooshahay haddii degmada aad hadda ku nooshahay ay ka duwan tahay degmadaada leh mas'uuliyada dhaqaale.

Maxkamadu way sii wadi kartaa haynta maxkamada haddii maxkamadu aaminsan tahay inaad waxyeello jireed oo daran u gaysan karto naftaada ama dadka kale haddii aan lagu xirin. Maxkamadu sidoo kale waxay u magacaabi kartaa go'aan qaade beddel ah dhageysiga hordhaca ah si laguugu ogolaado daawooyinka neerfaha.

Dhagaysigaa buuxa ee xukminta daawaynta kahor, dhakhtarka ama cilmu-nafsiyaqaan leh shahaadada takhasuska doktornimada cilmu-nafsigu waa inuu kugu sameeyo baaritaan. Maxkamada ayaa magacaabi doonta baaraha. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay baaritaan labaad oo uu sameeyo dhakhtar aad dooratay. Degmada ayaa bixin doonta labada baaritaanba.

4) Dhageysigaaga xukminta daawaynta

Wakhtiga iyo Goobta

Dhageysiga xukminta daawaynta waxaa lagu qabtaa goob maxkamad ah waxayna raacaysaa habraaca rasmiga ee maxkamada si loo ilaaliyo xuquuqdaada. Dhagaysiga waxaa lagu qaban karaa cusbitaal hadii uu ogolyahay sharciga degaanku. Dhagaysiga xukminta daawaynta waa in lagu qabto 14 maalmood gudahood laga bilaabo markii codsiga la xareeyay, laakiin dhagaysiga waxaa lagu kordhin karaa 30 maalmood oo dheeri ah. Waxaad dalban kartaa dhagaysi deg deg ah in lagu qabto 5 maalmood oo shaqo gudahood, laakiin maxkamada ayaa waxaa laga yaabaa inay bixiso muddo kordhin ilaa 10 maalmood oo dheeri ah oo leh sabab macquul ah.

Xuquuqaha

Waxaad xaq u leedahay inaad timaado dhagaysiga, inaad markhaati furto oo aad soo bandhigto caddaymo inta dhagaysigu socdo. Waa inaad kala hadasho qareenkaaga sida ugu wanaagsan ee kiis fiican la isugu hagaajisto. (Eeg: Xaashida Xaqiiqda ee Waxa ay tahay Inaad ka Filato Qareenkaaga.) Waxaad dooran kartaa inaadan ka soo qaybgalin dhagaysiga. Maxkamada ayaa kaa reebi karta haddii ay dareento inaad si dhab ah qas u gaysanayso ama aadan awoodin inaad fahanto ama aad ka qaybqaadato dacwada.

Awoodaada aad kaga qayb galayso dhagaysiga waa inaysan carqaladaynin daawadu. Waxaad xaq u leedahay inaadan qaadanin dawooyinka inta lagu jiro dhagaysiga. Haddii aad qaadanayso daawooyin, maxkamada waa in lasoo siiyo liiska daawooyinka aad qaadatay 48-dii saac ee la soo dhaafay.

Natiijooyinka

Maxkamadu waxay amri kartaa in laguu xukumo daawayta haddii ay hesho natiijooyin ku salaysan caddayn cad oo lagu qanci karo oo ah:

1. In aad tahay qof halis ugu jira waxyeelo in uu gaysto maadaama oo aad qabto cudurka dhimirka, in aad kiimiko ku tiirsantahay ama qabto naafonimada korriinka
2. Waxaa jirta suurtagalnimo wayn inaad jir ahaan waxyeello u geysato naftaada ama dadka kale sida ay muujinayso:
   a. ku guuldaraysiga helitaanka cuntada, dharka, hoyga ama daryeelka caafimaad oo ay keentay naafonimada awgeed,
   b. isku day dhawaanahan ah ama hanjabaad in aad jir ahaan waxyeello u gaysto naftaada ama dadka kale,
   c. Awood la'aanta (oo aan ahayn saboolnimada) inaad keensato cunto, dhar, hoy ama daryeel caafimaad ama,
   d. doonista ku dhaqan dabeecad ku lug leh waxyeelo weyn gaarsiinta hanti.
3. Ma jiro barnaamij daawayn xaddidnaan yar oo dabooli kara baahidaada daawaynta.

Dhererka xukminta daawaynta ee hore kama badnaan karo lix bilood. Lix bilood marka ay gaarto, amar maxkamadeed oo kale ayaa lagama maarmaan u ah xukminta daawayn dheeraad ah. Tan macnaheedu maaha inaad ku jirtid cusbitaalka lixda bilood oo dhanba. Haddii shaqaalaha xarunta/barnaamijku ay dareemaan inaad diyaar u tahay ka saarista, way samayn karaan taas kahor inta aysan muddada xukunka daawayntu dhammaanin.

Xukunkan waxaa racfaan looga qaadan karaa maxkamada rafcaanka. Kala hadal qareenkaaga haddii aad rabto inaad rafcaan ka qaadato xukunkaaga.

5) Natiijooyinka Kale ee Xukmintaada Daawaynta

Siidaynta xukminta daawaynta kahor

Laba beddelaad oo ka xadidnaan yar xukminta daawaynta waa "sii wadista loogu talagalay siidaynta" iyo "amarka daynta in ay sii joogto xukminta daawayntu" Maxkamadu waxay sii wadi kartaa kiiska dacwada siidaynta illaa 90 maalmood ka dib marka la diido codsiga. Maxkamadu sidoo kale way dayn kartaa in uu sii

joogo amarka xukminta daawayntu illaa 6 bilood, oo soconaya illaa iyo inta bukaanku u hogaansanyahay shuruudaha joogitaanka. Xukminta Daawaynta ee la aqbalay in ay sii joogto waxaa dib loo cusbooneysiin karaa 12 bilood oo dheeri ah haddii loo baahdo.

Haddii amarka xukminta daawaynta la aqbalo in uu sii joogo in ka badan 14 maalmood, maxkamadu waa inay soo saarto amar ay ku jiraan:

1. qorshe qoran oo ku saabsan adeegyada oo aad ogoshahay;
2. ogaanshaha ah in daawaynta la heli karo;
3. waxaa la hayaa lacag lagu bixiyo, iyo
4. shuruudaha ay tahay inaad buuxiso si aad uga maaranto ka noqoshada joogitaanka.

Maareeyaha kiiska ayaa laguu xilsaari doonaa si uu maxkamada ugu wargaliyo horumarkaaga. Haddii aad "si weyn" ugu hoggaansami waydo shuruudaha, maareeyaha kiisku waa inuu ku soo wargeliyo guuldaraysigan maxkamada. Haddii maamulaha kiiska ama maxkamadu ay rabto inay ka noqdaan sii deyntaada, dacwad dhagaysi ah waa in loo qabto ka noqoshada la soo jeediyay.

Daawaynta ku salaysan bulshada dhexdeeda
Waa suurtagal in laguu xukmiyo ku daawaynta xarun daawayn ama barnaamij ku salaysan bulshada dhexdeeda, haddii uu yahay barnaamij deggenaasho ah iyo haddii uuna ahaynba. Haddii maxkamadu ogaato in u xukminta daawaynta ku salaysan bulshadu ay haboontahay, qorshe qoraal ah oo adeegyada ah waa in la abuuro oo ay la socdaan shuruudaha ay tahay inaad u hoggaansanaato iyo cawaaqibka ka dhalan karta u hoggaansanaan la'aanta. Cawaaqibta ka iman karta u hogaansanaan la'aanta waxaa ka mid noqon kara in lagugu xukmiyo meel tan ka xaddidaad badan. Si laguugu xukmiyo daawaynta ku salaysan bulshada dhexdeeda, maxkamadu waa inay ogaato in daawaynta aad u baahantahay la heli karo oo lacag lagu bixin karo. Tani waxay ku lug yeelan kartaa su'aasha ah inaad bixin karto kharashka daawaynta iyo inkale. Qorshayaasha caymiska caafimaadka qaarkood ayaa laga yaabaa inay bixiyaan kharashka daawaynta noocan ah. Haddii caymiskaagu bixiyo daawaynta noocan ah, waa inay bixiyaan kharashka daryeelka sida uu qabo xeerka caymiskaaagu. Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka) ama degmada ayaa sidoo kale laga yaabaa inay waajib ku tahay inay bixiyaan daawayntan.

6) Sii wadista xukunkaaga daawaynta

Haddii cusbitaalka, barnaamijka daawaynta ee ay dowladu maamusho, xarunta daawaynta, ama barnaamijka daawaynta ee bulshada ku salaysani aysan dareemaynin inaad diyaar u tahay in lagu siidaayo dhamaadka lixda bilood, maxkamada ayaa waxay ballan u qaban doontaa dhagaysi kale si loo kordhiyo xukminta daawaynta. Waxaad leedahay xuquuq la mid ah tan dacwada koowaad, oo ay ku jirto xuquuqda aad u leedahay baadhe labaad. Haddii maxkamadu go'aamiso inaad u baahan tahay daawayn joogto ah, waxaa laguu xukmin daawayn aan kabadnayn 12 bilood ah. Mar labaad, haddii shaqaalaha cusbitaalku ay dareemaan inaad diyaar u tahay, way ku siidayn karaan wakhti kasta.

7) Dib u eegista xukunkaaga

Haddii aad rumaysan tahay daawaynta lagu siiyo iyadoo lagu xukminayaa aysan hadda ahayn mid loo baahanyahay ama aad hadda ka dib aadan khatar waxyeello gaysanaynin, waxaad xaq u leedahay inaad codsato inay maxkamadu kaa saarto xukmintaada daawaynta. Waxaad waydiisan kartaa maxkamada inay dib u eegto wakhti kasta. La xiriir qareenkaaga si uu kaaga caawiyo gudbinta codsiga si dib loogu eego dacwadaada.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 332 Minnesota Street, Ste W1410, First National Bank Building, Saint Paul, Minnesota 55101-2117,https://mn.gov/omhdd/ Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.